# kWh kastaa waa muhiim

**Aynu iska kaashanno kaydinta korontada. Isbeddel kastaa faa'iido ayuu u leeyahay hadafka guud.**

Swedish Energy Agency

# kastaa waa muhiim

## kWh kastaa waa muhiim

Xaaladda tamarta ee Iswiidhan iyo Yurub inteeda kale way adag tahay. Heerka sicir ee korontadu wuu sarreeyaa oo ka sii kici karaa. Waxa kale oo jirta khatar koronto yaraan saacadaha qaarkood ee jiilaalkan. Wadajir ayaynu xaaladdan ku wanaajin karnaa innagoo yaraynnayna isticmaalka koronto Waxaad halkan ka heleysaa macluumaad ku saabsan sababta aan ugu baahanahay inaan hoos u dhigno isticmaalka korontada iyo sida aad wax ugu biirin karto.

### Waa maxay sababta aynu u yaraynayno isticmaalka koronto?

Dagaalka Yukrayn ayaa cawaaqib ku yeeshay korontadii Iswiidhin. Waxay keentay in qiimaha korontadu uu kaco oo ay yaraato fursadaha lagu soo iibsan karo koronto marka loo baahdo. Si loo hagaajiyo xaaladda, dhammaanteen waxaynu u baahannahay inaan ka qayb qaadanno dhimista isticmaalka korontada. Waa kuwan saddex sababood:

#### Si loo dhimo qiimaha korontada

Qiimaha korontada ee sarreeyaa dad badan ayuu caqabad ku yahay. Markaad dhinto isticmaalka korontada, waxaad dhimi kartaa kharashkaaga. Baahida koronto ee la dhimay ayaa sidoo kale si togan u saameyn karta qiimaha guud ahaan. Marka baahida korontadu hoos u dhacdo, sidoo kale qiimaha korontada ayaa hoos u dhacaya.

#### Waxaynu yaraynaynaa khatarta koronto yaraanta jiilaalka

Marka aan isticmaalno koronto yar ama aan isticmaalka u wareejinno waqtiyada baahida guud ay hooseyso, waxaan yareynaynaa culeyska korontada waxaana hoos u dhigaynaa halista koronto go'idda ee ay sababto isku dheelitir la'aanta u dhexeeya saadka iyo baahida. Waa inaan immika wax ka qabannaa si aan u hubinno xaaladaha ugu wanaagsan ee jiilaalka marka xaaladdu ay noqoto mid aad u cakiran.


#### Waxaynu muujinaynaa wadajir

Markaynu yarayno isticmaalka korontada Iswiidhan oo kaliya isma caawinayno, waxaynu sidoo kale caawinaynaa dalalka jaarkeenna. Markaynu dhoofinno koronto nadiif ah oo foosil lahayn waxay yaraynaysaa baahida shidaalka foosilka ee qaaradda. Markaynu badinno dhoofinta baahida gaasta ayaa yaraanaysa.

### Waxan ayaad samayn kartaa


Dhammaanteen waxaynu u baahannahay inaynu gacan ka geysanno dhimista isticmaalka korontada, ficillada maantuna waxay saameyn karaan xaaladda berrito. Isbeddel yar oo kastaa isbeddel weyn ayuu ku keenayaa ta guud, haddii aynu iska kaashanno. Saacaddiiba Kilowaat kastaa waa muhiim

Waxa aad guriga ku qabato iyo sida aad shaqada uga qayb qaadato waxa ay samaynayaan isbeddel isku mid ah. Talooyinku waa wax fudud, laakiin waxtar leh.




## Isticmaal koronto xilliga habboon ee maalineed

Waxaad dharka dhaqataa, weelka dhaqataa oo jaajaraysaa baabuurkaaga korontada xilliga isticmaalka korontada ee warshadaha, howlaha guud iyo guryaha ugu hooseeyo. Xilligani waa badhtamaha maalinta, habeenkii xilliga danbe iyo maalmaha fasaxa ah. Tani waa mid ka mid ah tallaabooyinka ugu muhiimsan ee aad ku yarayn karto culeyska shabakadda korontada. Laakiin, mar walba tixgeli badbaadada dabka oo isha ku hay qalabka kuu shidan.




## Hoos u dhig kululaynta guriga

Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay qofka leh nidaamka kululaynta elektrigga ah. Haddii aad kulka guriga 1 digrii dhinto waxa isticmaalkaaga koronto hoos u dhacayaa boqolkiiba shan ku dhawaad. Haddii aad weliba u wareejiso kuleyliyahaaga elektirigga ah badhtamaha maalinta iyo habeenka, waxay faa'iido u tahay shabakadda koronatada.



## Yaree isticmaalka biyaha kulul

Yaree biyaha aad ku qubaysanayso oo buuxi makiinada weelasha dhaqda iyo mashiinka dharka. Markaad u baddelato qasabadaha iyo madaxa qubeyska ee biyaha beekhaamiya, waxaad hoos u dhigi kartaa isticmaalka biyaha kulul ilaa boqolkiiba 40.



## Dami qalabka korontada iyo laambadaha

Demi dhammaan qalabka korontada marka aad qolka ka baxayso. U beddelo laambadaha LED-ga maadaama ay isticmalaan afar ilaa shan jeer in ka yar laambadaha halogen:ka.



## Ku hay kulka gudaha guriga

Kulka ay sii daayaan guryaha wuu badnaan karaa Eeg oo hagaaji laymanka daboolaya daaqadaha iyo albaabada. Haddii aad qorshaynayso dib-u-hagaajin: hubi, tusaale ahaan, inaad gufayn dheeraada samayso, beddesho daaqadaha ama aad hagaajiso qulqulka hawada.



## Ka feker waxaad u isticmaasho korontada

Ka fogow waxyaabaha korontada badan qaata ee aan loo baahnayn, sida kulka sagxadda hoosteeda ee korontada, saunada, iyo qalajisada. Haddii ay qasab tahay in aad shido kulka sagxadda hoose, ku hay heerkul la mid ah ka guriga intiisa kale si aad uga fogaato isticmaalka koronto aan loo baahnayn.

## Weydii la taliyaha tamarta iyo cimilada

La talinta tamarta iyo cimiladu waa adeeg ay degmooyinka iswiidhan oo dhan bixiyaan si ay kaaga caawiyaan dhimista isticmaalka tamarta oo aad u noqoto qof tamarta xog-ogaal u ah.

Wakaaladda Tamarta ee dalka Iswiidhan (The Swedish Energy Agency) ayaa maalgelisay adeegga, waana bilaash oo ganacsi ahaanna madaxbannaan.

### Lataliyaha tamarta iyo cimilada ayaa diyaar u ah

- shakhsiyaadka
- shirkadaha yaryar iyo kuwa dhexdhexaadka ah
- ururada mulkiilayaasha-kiraystayaasha
- mulkiilayaasha guryaha gaarka loo leeyahay
- ururrada

### Siyaabo badan oo lagu helo talooyin fiican

Si aad ula xidhiidho la-taliyaha tamarta iyo cimilada ee degmadaada, waad wici kartaa, iimayl diri kartaa ama booqasho u iman kartaa. Waxaad sidoo kale websaytka degmadaada ka heli kartaa macluumaadka tamarta iyo cimilada .

Qaar ka mid ah la-taliyayaasha tamarta iyo cimilada ayaa mararka qaarkood talooyin ka bixiyo maktabadaha iyo meelaha kale ee dadweynaha.
Waxa kale oo laga heli karaa carwooyinka guryaha, maalmaha bay'adda iyo hawlaha la midka ah.

Tusaalooyinka su'aalaha halka la-taliyaha tamarta iyo cimiladu uu kaa caawin karo:

- Sida aad u yarayn karto isticmaalka tamarta gurigaaga
- Maxay yihiin faa'iidooyinka iyo khasaaraha hababka kulaylin ee kala duwan
- Sida aad tamarta cadceedda ugu isticmaali karto kulaylinta, biyo kululaynta iyo korontada
- Maxaad u baahan tahay inaad tixgeliso markaad dib u hagaajinayso ama guri cusub dhiseyso
- Laambadaha laga helo suuqa, iyo sida aad ugu qurxin karto laambado baahi ku salaysan
- Waa maxay deeqaha iyo taageerada immika jira ee aad ka codsan karto qeybta tamarta
- Waxa sidoo kale talooyinka ku jira gaadiidka, sida waxa ay tahay inaad ka fikirto iyo taageerooyinka la heli karo
- markaad rakibayso goobaha laga dabaynayo baabuurta elektrigga ah.

**kastaa waa muhiim**

### Qaddarkee ayaynu u baahannahay inaynu yareynayno isticmaalka korontada?

Sida laga soo xigtay Hay'adda shabakadda Korontada ee Iswiidhan, khatarta inay korontadu go'do waxay hoos u dhici kartaa boqolkiiba 20 haddii aynu isticmaalka korontada hoos u dhigno boqolkiiba laba. Waa isla sidaasoo kale haddii aynu ka isticmaalka koronto ka wareejinno boqolkiiba laba xilliyada ugu sarreeya ee subaxdii iyo fiidkii.

Boqolkiiba laba isticmaalka guud ee korontada ee Iswiidhan qiyaastii waa 3 TWh (terawatt saacad). Tani qiyaas ahaan waa waxaynu si wada jir ah u dhimi karno markaynu kulka guriga hal digrii hoos u dhigno oo ay kala badhno isticmaalka biyaha kulul, kaliya guryaha.

## Sababtan ayaannu immika u soo saaraynaa talooyinkan

Waxaynu ku jirnaa xaalad adag oo uu dagaal ka socdo Yurub oo saameyn weyn ku leh suuqyada tamarta taasoo ugu dambeyntii keenta inuu qiimaha korontadu kaco. Xaaladdan oo kale, waxaynu u baahannahay in aynu isticmaalno koronto yar. Markan aynu sidoo kale galeyno xilli qabow oo mugdi ah, oo u baahan kululaynta gudaha iyo isticmaalka koronto sarreyso waa mid aad u sii muhiim ah. Dad badan ayaa raba inay ogaadaan sida ay uga qayb qaadan karaan fududaynta xaaladda.

Sidaa darteed Wakaalada Tamartu waxay si balaadhan ugu wargalinaysaa si ay gacan uga geysato beddelka caadooyinka iyo kordhinta aqoonta ku saabsan waxa hoos u dhaca isticmaalka korantadu ay soo kordhin karto. Waxay samayn kartaa isbeddel immika iyo inta lagu jiro xilliga jiilaalka adagba. Ololahan xog-gudbinta ayaa sidoo kale waafaqsan sharciga cusub ee Midowga Yurub ee faragelinta xaaladdan degdegga ah ee suuqa korontada, kaas oo la go'aamiyay 30kii Sebtembar 2022. Waxa marka la soo bandhigay waajibaad ah in la dhimo isticmaalka korontada ugu yaraan boqolkiiba 5 saacadaha ugu sarreeya. Waa xilligan marka uu soosaarka tamarta gaastu uu saamayn sare ku leeyahay qiimaha korontada.

Wadamada EU:du waa inay ku dadaalaan inay yareeyaan baahida guud ee koronto ugu yaraan boqolkiiba 10 ilaa iyo 31 Maars 2023.

Laakin dariiqa loo maro nidaamka tamarta waara ee mustaqbalka fog waa in dhammaanteen aynu u isticmaalno korontada si ka hufan – oo aan ahayn yaraynta koronto oo kaliya. Waxa aannu aragnaa in korontaynta waaxaha gaadiidka iyo warshaduhuba ay yihiin mid ka mid ah qaybaha ugu muhiimsan ee bulsho waarta.

Laga bilaabo 1 Oktoobar 2022, Wakaaladda Tamartu waxay leedahay mas'uuliyadda isuduwidda qaybta tamarta ee arrimaha u diyaargarowga, iyo waxyaabo kale.

### Laakiin, ma la kaydin karaa koronto?

Maya, koronto lama kaydin karo. Ololahayaga waxaannu isticmaalaynaa hal-ku-dhegga ah “kaydi korontada”. Si kastaba ha ahaatee, tani waa hal-ku-dheg fudud, maaddaama korontadu ay tahay in la isticmaalo isla marka la dhaliyo. Laakiin marka aynu yareyno isticmaalka korontada, waxaynu kaydinaynaa biyaha warshadda tamarta korontada iyo shidaalka loo baahan yahay si looga dhaliyo koronto marawaxadaha uumiga. Isla mar ahaantaana, waxa aynu sidoo kale yareynaa kharashaadka, waxaanaynu hubineynaa inaynu yaraynaynaa in shabakadda carqaladeyn ku timaaddo.

# Tamar waarta oo nadiif ah

Wakaalada Tamarta waxay hogaamineysaa u gudubka nidaam tamar oo waara.

Waxa aannu ku biirinnaa xaqiiqooyin, aqoon, iyo falanqayn ku saabsan saadka iyo isticmaalka tamarta ee bulshada, waxa aannu sidoo kale ka shaqaynaa sugnaanshaha helitaanka tamarta.

Waxa aannu taageernaa cilmi-baadhis ku saabsan tignoolajiyada tamarta cusub iyo kuwa la cusboonaysiin karo, koronto qaadayaasha casriga ah, iyo sidoo kale baabuurta iyo gaadiidka shidaalka mustaqbalka. Waxa aannu sidoo kale taageernaa horumarinta ganacsi ee suurtogalinaya ka-ganacsiga hal-abuurnimada tamarta la xidhiidha, waxaanannu hubinnaa in xalalka teknoloji ee tamarta nadiifta ah la dhoofin karo.

Waxaannu ka mas'uul nahay tirakoobka tamarta rasmiga ah, iyo maaraynta Nidaamka Shahaadaynta Korontada iyo Nidaamka xuquuqda sii-daynta qiiqa shidaalka.

Waxaannu sidoo kale ka qaybqaadannaa iskaashiyada caalami, oo gudbinnaa xaqiiqooyinka isticmaalka koronto ee guryaha, warshadaha, iyo hay'adaha dawladeed.

**Wakaaladda Tamarta ee Iswiidhan**
Box 310, 631 04 Eskilstuna, Sweden
+4616-544 20 00
registrator@energimyndigheten.se
www.myndigheten.se

Swedish Energy Agency